KU DHAQAN XAFIIS D.

# Faafin Rasmi ah

EE JAMHURIYADDA DIMUQRADIGA SOMALIYA

Sannadka 2aad | Moqdisho, Tr. 1 Settembre 1974 | L. 9

Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah
ee ka tirsan Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka

FAAFIN BIL SOO BAXA

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — RUKUNKA: Sanadii waa Sh. 100 Samaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qoritaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba shilin — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinaya Xafiiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

# KOBNIIN

## BOGGA KOOWAAD

### SHARCI

### W. M.

## BOGGA LABAAD

### XEER DOWLADEED


XEER MADAXTOOYADA GOLAHA SARE EE KACAANKA, Tr. 7 Febrayo 1974, L. 77 — *Qaadasho Macallimiin ku meel gaadha.* Bog. 386

XEER MADAXTOOYADA GOLAHA SARE EE KACAANKA, Tr. 10 Luulyo 1974, L. 78 — *Sarreeye Guuto Maxamed Jaamac Xarbi oo shaqada ka fadhiistay.* » 387

XEER WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA, Tr. 23 Luulyo 1974, L. 79 — *Magacaawgii idaaradda guddiga Kacaanka degmada Ceel-Waaq qaybtiisa Wakiilada Beesha.* » 388

XEER WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA, Tr. 23 Luulyo 1974, L. 80 — *Magacaawgii idaaradda guddiga Kacaanka degmada Ceel-Berde, qaybtiisa Wakiilada Beesha.* » 389

XEER WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA, Tr. 23 Luulyo 1974, L. 81 — *Magacaawgii idaaradda guddiba Kacaanka degmada Tiveglow qaybtiisa Wakiilda Beesha.* » 391

XEER WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA, Tr. 7 Agosto 1974, L. 82 — *Magacaawgii idaaradda guddiga Kacaanka degmada Qusax-Dheere qaybtiisa Wakiilada Beesha.* Bog. 392

XEER WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA; Tr. 7 Agosto 1974. L. 83 — *Ka saarid Jaalle Xaaji Daauud Xusen Guddiga Kacaanka degmada Qoryooley iyo Magacaabid Jaalle Maxamed Yuusuf Cabdulleh.* » 393

XEER WASAARADDA HAWLAH GUUD, Tr. 2 Juunyo 1974, L. 84 — *Siismo dhul Dawladeed la siiyay Jaalle Maxamed Midowe Aadan - kuna yaal Magaaladda Baydhaba.* » 394

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Tr. 27 Juunyo 1974, L. 85 — *Dhul gatay Jaalle Maxamed Buxoo Faqi ku fadhiya Mq. 273 kuna yaal Xamar - Xafadda Xamar Jeb-Jeb.* » 395

XEER WASAARADDA GANACSIGA GUDAHA, Tr. 23 Luulyo 1974, L. 86 — *Qiimaha Saliida.* » 397

---

# BOGGA SEDEXAAD

TALOOYIN, ISGARSIIN. OGEYSIIS, IYO WAXII LA MID AH.

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada dhul *Jaalle Khadiija Maxamed Diiriye. (167)* Bog. 398

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada dhul *Jaalle Seynab Shekh Cali. (168)* » 398

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada dhul *Jaalle Xaaji Qeyre Cali. (169)* » 399

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada dhul *Jaalle Xasan Geedi Siyaad. (170)* » 399

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada dhul *Jaalle Axmed Caddaawe Cosoble. (171)* » 400

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada dhul *Jaalle Soleemaan Maxamed Saciid. (172)* » 401

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada dhul *Jaalle Xuseen Maxamed Cali. (173)* » 401

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada dhul *Jaalle Maxamed Xuseen Cosoble. (174)* » 402

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada dhul *Jaalle Cabdullahi Cabdi Xaaji Axmed. (175)* Bog. 402

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada dhul *Jaalle Aadan Cocsoble Xersi. (176)* » 403

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada dhul *Jaalle Maryan Maxamuud Gacal. (177)* » 403

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada dhul *Jaalle Seynab Xasan Maxamed. (178)* » 404

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada dhul *Jaalle Saalim Cawad Saalax. (179)* » 404

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada dhul *Jaalle Saalim Maxamed Cabduraxman. (180)* » 405

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada dhul *Jaalle Saalax Salim Cabdulxabid. (181)* » 405

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeys. Badalaad dhul *Jaalle Xasna Cabdulle Barre. (182)* » 406

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeys. Badalaad dhul *Jaalle Maxamud Jumcaale Maxamed. (183)* » 406

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeys. Badalaad dhul *Jaalle Mediina Uehliye Rooble. (184)* » 407

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeys. Badalaad dhul *Jaalle Makaay Wehliye Rooble. (185)* » 408

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeys. Badalaad dhul *Jaalle Kutubey Wehliye Rooble. (186)* » 408

GUDDOOMIYAHA DEGMADA KISMAYO, Ogeysiis Naada dhul *Jaalle Shariif Maxamed Saalax Bayti. (187)* » 409

GUDDOOMIYAHA DEGMADA BAYDHABA, Ogeysiis Naada dhul *Jaalle Maxamed Shekh Cali Aadan. (188)* » 409

MORODI S.p.A. MUQDISHO, Ogeysiis *Qeybka warku fadhiga aan caadiga ahein. (189)* » 410

MORODI S.p.A. MOGADISHO, Avviso *Estratto Verbale di di Assemblea Straordinaria. (189)* » 410

SOCIETA' GENERALE SOMALA, Ogeysiis *Qeybta warku fadhiga aan caadiga aheiyn oo Shariikadda Qeybaha leh. (190)* » 410

SOCIETA' GENERALE SOMALA S.p.A., Avviso *Estratto Verbale di Assemblea Straordinaria. (190)* » 411

XAFIISKA GARYAQAANNADA DOWLADDA — *Dhismo Rasmi ah ee Shirkadda «Società Agricola Zootecnia Internazionale» S.p.A. (SAZI). (190 bis)* » 411

UFFICIO DEL NOTAIO DELLA REPUBBLICA — *Costituzione della Società Agricola Zootecnia Internazionale S.p.A. (SAZI). 190 bis).* » 112

# BOGGA LABAAD

## XEER DOWLADEED

XEER MADAXTOOYADA GOLAHA SARE EE KACAANKA
Tr. 7 Febrayo 1974, L. 77.

Qaadasho Macallimiin ku meel gaadha.

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaashiddii 1aad iyo tii 2aad Kacaanka 21 Oktoober 1969;

ISAGOO AQOONSADAY in baahi loo qabo macallimiin ku filan dugsiyada dalka, lagama maarmaanna ay tahay in macallimiin ku meel gaadh ah loo qoro Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta lagana qaato ardayda dhigata dugsiyada Sare, kuwa Jaamacadaha dalka iyo shaqaalaha Dawladda oo doonaya;

ISAGOO SALDHIG U AH sharciga taariikhdiisu tahay 27 Febrayo 1956 iyo beddelkii ka dambeeyey ee lagu sameeyey sharciga taariikhdiisu tahay 1 Junyo 1965 Lamb. 6;

ISAGOO TIXGELINAYA go'aankii Golaha Sare ee Kacaanka iyo Golaha Xoghayayaasha Dawladda;

WUXUU XEERAYAA

Qodobka 1aad

Waxa awood loo siiyey Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta inay sannad kasta gudihiisa qori karto macallimiin ku meel gaadh ah oo aan ka badnaan karin 500 qof, kana koobnaan doona ardayda dhigata Dugsiyada Sare, kuwa Jaamacadaha dalka iyo ninkii kale Soomaali ah ee u qalma macallinimo.

2. Qoriddaas ama qaadashadaas waxaa lagu soo saari doonaa Xeer uu soo saxeexo Xoghayaha Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta.

Qodobka 2aad

Dadka loo qaato macallinimo ku meel gaadh ah, waxay xaq u leeyihiin in la siiyo Sh. So. 100/- (boqol), bil walba muddada shaqada ay ku jiraan, lacagtaaso kharaj iyo cashuur la'aan ah.

2. Kharajkaas wuxuu ka baxayaa titolka 1-19-0. kabitolka 1.1.2. ee sanadka 1974 iyo sannadaha ka dambeeya.

3. Lacagta macallimiinta ku meel gaadhka ah qaban maayo qaynuunka 28 Sebet. 1970.

Qodobka 3aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa 10ka Dis. 1973; waxaana lagu qori doona Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.
Muqdisho, 7 Bebrayo 1974.

*Jaalle Sarreeye G. Maxamed Siyaad Barre*
GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

---

XEER MADAXTOOYADA GOLAHA SARE EE KACAANKA
Tr. 10 Luulyo 1974, L. 78.

Sarreeye Guuto Maxamed Jaamac Xarbi oo shaqada ka fadhiistay.

GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

MARKUU ARKAY Xaashidii koowaad iyo tii labaad ee Kacaanka;

MARKUU ARKAY Qodobka 19 (1) (b) ee Xeerka Boliska, Xeer Lamb. 14 ee 4tii Janaayo 1973;

MARKUU ARKAY Qodobbada 11 iyo 12 ee sharci lam. 6 ee 31kii Disambar 1969kii, ee saameeya xaqa iyo Gunnada Ciidammada Qalabka sida (Pension and Gratuity);

MARKUU FIIRIYEY go'aankii warbixinta caafimaadka ee Gudiga Takhaatiirka ah ee Militeriga Ururka Midowga Soofiyeedka, oo marka afka Ingiriiska lagu tarjumo odhanaya, «In accordance with the conclusion of the Military Doctors Committee, Brigadier General Mohamed Jama Harbi is not medically fit»;

MARKUU DHEGAYSTAY taladii Taliyaha Ciidanka Boliiska;

MARKUU AQONSADAY ra'yigii Xoghayaha Arrimaha Gudaha;

WUXUU AMRAY

Qodobka 1

In Sarreeye Guuto Maxamed Jaamac Xarbi uu ka fadhiisto shaqada caafimaadkiisa oo xumaaday awgeed, marka laga bilaabo 10ka luuliyo 1974ka.

Qodobka 2

In Sarreeye Guutoha kor ku magacaaban la siiyo wixii xaq iyo Gunno ah ee uu siinayo sharcigu (lam. 6 ee 31kii disambar 1969).

Qodobka 3

Xeerkanu degdeg buu u dhaqan gelayaa.

Muqdisho, 10 Luuliyo 1974.

MADAXWEYNAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
*Jaalle Sareeye Gaas Maxamed Siyad Barre*

Xoghayaha Arrimaha Gudaha
*Jaalle Xuseen Kulmiye Afrax*

*VISTO e registrato - Reg. n. 3, foglio n. 167.*
*Mogadiscio, 30 Luglio 1974.*
*Il Sostituto Magistrato ai Conti:*
Jaalle MAXAMED CALI FAARAX

---

**XEER WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA**
**Tr. 23 Luuliyo 1974, L. 79.**

**Magacaawgii Idaarada Guddiga Kacaanka Degmada Ceel-Waaq Qaybtiisa Wakiilada Beesha.**

WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA

ISAGOO ARKAY Xaashida Koowaad iyo Tan Labaad ee Kacaanka 21 Oktobar 1969kii;

ISAGOO ARKAY Sharciga Lambarkiisu yahay 52 ee 8dii Juunyo 1972 ee lagu maamulo Dawladda Hoose;

ISAGOO ARKAY Xeerka Guddoomiyaha Golaha Sare ee Kacaanka ee Lambarkiisu yahay 49 ee 8dii Bisha Febbrayo 1973 ee lagu dhisay Gobalada iyo Degmooyinka cusub;

ISAGOO OGAADAY In ay tahay lagama maarmaan in la magacaabo Wakiillada Beesha oo Idaaradda Guddiga Kacaanka Degmada xagga sare ku qoran;

ISAGOO TIXGELINAYA Taladi Guddiga Kacaanka Gobolka Gedo,

WUXUU GOOYEY

Qodobka 1aad

Ka bilaabanta taariikhda xeerkan dadka magacyadoodu halkan hoose ku qoran yihiin waxaa loo magacaabay in ay noqdaan Idaaradda Guddiga Kacaanka Degmada Ceel-Waaq qeybta Wakiilada Beesha:

1. Cismaan Maxamuud Maxamed,
2. Maxamed Cali Xasan,
3. Sharif Idiris Nuur,
4. Xulbado Macalim Maxamed Ibraahim,
5. Maxamed Yaasiin Cige,
6. Aadan Axmed Cali,
7. Maxamed Cumar Maxamed,
8. Sh. Xasan Iftiin Axmed,
9. Yuusuf Maxamed Cabdi.

DHAQAN GAL

Qodobka 2aad

Xeerkani isla maanta ayuu dhaqan gelayaa waana in lagu qoro faafinta ah ee Dawladda.

Muqdisho, 23-7-1974.

Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda
Arrimaha Gudaha
*S. G. Xuseen Kulmiye*

*VISTO e registrato - Reg. n. 1, foglio n. 68.*
*Muqdisho, 29 Luglio 1974.*
*Il Sostituto Magistrato ai Conti:*
Jaalle MAXAMED CALI FAARAX

---

**XEER WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA**
**Tr. 23 Lulyo 1974, L. 80.**

**Magacaawgii Idaaradda Guddiga Kacaanka Degmada Ceel-Barde qaybtiisa Wakiillada Beesha.**

WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA

ISAGOO ARKAY Xeeshida Koowaad iyo Tan Labaad ee Kacaanka 21 Oktobar 1969kii;

ISAGOO ARKAY Sharciga Lambarkiisu yahay 52 ee 8dii Juunyo 1972 ee lagu maamulo Dawladda Hoose;

ISAGOO ARKAY Xeerka Guddoomiyaha Golaha Sare ee Kacaanka ee lambarkiisu yahay 49 ee 8dii Bisha Febbrayo 1973 ee lagu dhisay Goballada iyo Degmooyinka cusub;

ISAGOO OGAADAY In ay tahay lagama maarmaan in la magacaabo Wakiillada Beesha oo Idaaradda Guddiga Kacaanka Degmada xagga sare ku qoran;

ISAGOO TIXGELINAYA Taladi Guddiga Kacaanka Gobolka Bakool;

WUXUU GOOYEY

Qodobka 1aad

Ka bilaabanta taariikhda xeerkan dadka magacyadoodu halkan hoose ku qoran yihiin waxaa loo magacaabay in ay noqdaan idaaradda Guddiga Kacaanka Degmada Ceel-Barde qaybta Wakiillada Beesha:

1. Sheekh Maxamed Aadan «Coomey»,
2. Sheekh Maxamed Xuseen Cali,
3. Gaasim Nuur Khaliif,
4. Xasan Nuur Khaliif,
5. Cumar Sooyan Xasan,
6. Cilmooge Jacuur Axmed,
7. Cbdi Xalane Cabdi,
8. Xaajiya Xaawa Cigaal,
9. Xadifida Sahal Samantar.

DHAQAN GAL

Qodobka 2aad

Xeerkani isla maanta ayuudhaqan geli waana in lagu qoro faafinta rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 23-7-1974.

Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda
Arrimaha Gudaha
*S. G. Xuseen Kulmiye*

*VISTO e registrato - Reg. n. 1, foglio n. 69.*
*Mogadiscio, 29 Luglio 1974.*

*Il Sostituto Magistrato ai Conti:*

Jaalle MAXAMED CALI FAARAX

XEER WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA
Tr. 23 Luulyo 1974, L. 81.

Magacoowgii Idaaradda Guddiga Kacaan, Degmada Tiyegloa qaybtiisa Wakiiladda Beesha.

WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA

ISAGOO ARKAY Xaashida Kowaad iyo tan Labaad ee Kacaanka 21 Oktobar 1969kii;

ISAGOO ARKAY Sharciga Lambarkiisu yahay 52 ee 8 Juunyo 1972 ee lagu maamulo Dawladda Hoose;

ISAGOO ARKAY Xeerka Guddoomiyaha Golaha Sare ee Kacaanka ee Lambarkiisu yahay 49 ee 8 Bisha Febbrayo 1973 ee lagu dhisay Gobalada iyo Degmooyinka cusub;

ISAGOO OGAADAY In ay tahay lagama maarmaan in la magacaabo Wakiiladda Beesha oo Idaaradda Guddiga Kacaanka Degmada xagga sare ku qoran;

ISAGOO TIXGELINAYA Taladii Guddiga Kacaanka Gobolka Bakool;

WUXUU GOOYEY

Qodobka 1aad

Ka bilaabanto taariikhda xeerkan dadka magacyadoodu hoos ku qoran yihiin waxaa loo magacaabay in ay noqdaan Idaaradda Guddiga Kacaanka Degmada Tiyeglow qeybta Wakiilada Beesha:

1. Jaalle Macalim Ibrahim Sheekh Axmed
2. Jaalle Macalim Isaaq Xasan
3. Jaalle Aadan Nuur Ciise
4. Jaalle Macalim Aaden Isaaq Amiir
5. Jaalle Cali Axmed Salax
6. Jaalle Salaad Xusen Nuur
7. Jaalle Muslima Cabdalla Maxamed
8. Jaalle Xabiiba Caynab Maxamed
9. Jaalle Xasan Cabduraxman Caliyow.

DHAQAN GAL

Qodobka 2aad

Xeerkani isla maanta ayuu dhaqan geli waana in lagu qoro faafinta rasmiga ah ee Dawladda.
Muqdisho, 23-7-1974.

Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda
Arrimaha Gudaha
*S. G. Xuseen Kulmiye*

*VISTO e registrato - Reg. n. 1, foglio n. 70.*
*Mogadiscio, 29 Luglio 1974.*
*Il Sostituto Magistrato ai Conti:*
Jaalle MAXAMED CALI FAARAX

---

**XEER WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA**
**Tr. 7 Agosto 1974, L. 82.**

**Ka saarid Jaalle Xaaji Daauud Xusen Guddiga Kacaanka Degmada Qoryoley iyo Magacaabid Jaalle Maxamed Yuusuf Cabdulleh.**

WASAARADA ARRIMAHA GUDAHA

ISAGOO ARKAY Xaashidii 1da iyo tii Labaad ee Kacaanka 21ka Oktobar, 1969;

ISAGOO ARKAY Sharciga Lambarkiisu Yahay 52 ee soo baxay 8dii Juun, 1972 ee lagu maamulo Dowladdaha Hoose;

ISAGOO OGAADAY Baahidda loo qabo in Xaaji Daauud Xusen laga saari Idaarida Guddiga Kacaanka ee Degmada Qoryooley isla markaana bedelkii lagu magacaabo Jaalle Maxamed Yuusuf Cabdulleh;

ISAGOO TIXGELINAYA Taladii uu soo jeediyey Guddiga Kacaanka ee Gobolka Shabeelaha Hoose.

WUXUU GOOYEY

Qodobka 1aad

Marka laga bilaabo Taarikhda Xeerkan la dhaqan geliyo waxaa la gartay in Jaalle Xaaji Daauud Xusen oo ka tirsanaan jiray Xubin Guddiga Kacaanka ee Degmada Qoryooley laga saaro isla markaana lagu bedelo Jaalle Maxamed Yuusuf Cabdulleh kana mid noqdo Xubin Guddiga Kacaanka ee Degmada Qoryooley.

DHAQAN GAL

Qodobka 2aad

Xeerkanu isla maanta ayuu dhaqan geliyaa, waana in lagu qoraa Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda.
Muqdisho, 7 Agosto 1974.

Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda
Arrimaha Gudaha
*S. G. Xuseen Kulmiye*

*VISTO e registrato - Reg. n. 7, foglio n. 73.*
*Mogadiscio, li 12 Agosto 1974.*
*Il Magistrato ai Conti:*
Ten. Col. ABDULLAHI WARSAME NUR

---

**XEER WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA**
**Tr. 7 Agosto 1974, L. 83.**

**Magacaawgii Idaarada Guddiga Kacaanka Degmada Qansax-Dheere qaybtiisa Wakiilada Beesha.**

WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA

ISAGOO ARKAY Xaashida Koowaad iyo tan Labaad ee Kacaanka 21 Oktobar 1969kii;
ISAGOO ARKAY Sharciga Lambarkiisu yahay 52 ee 8dii Juunyo 1972 ee lagu maamulo Dowladda Hoose;
ISAGOO ARKAY Xeerka Guddoomiyaha Golaha Sare ee Kacaanka ee Lambarkiisu yahay 49 ee 8dii Bisha Febraayo 1973 ee lagu dhisay Gobalada iyo Degmooyinka cusub;
ISAGOO OGAADAY In ay tahay lagama maarmaan in la magacaabo Wakiillada Beesha oo Idaaradda Guddiga Kacaanka Degmada xagga sare ku qoran;
ISAGO TIXGELINAYA Taladi Guddiga Kacaanka Gobalka Bay.

WUXUU GOOYEY

Qodobka 1aad

Ka bilaabanta taarikhda xeerkan dadka magacyadoodu halkan hoose ku qoran yihiin waxaa loo magacaabay in ay noqdaan Idaaradda Guddiga Kacaanka Degmada Qansax-Dheere qeybta Wakiilada Beesha:

1. Cabdi Ibrahiim Macaalim,
2. Maxamed Adan Calin,
3. Cabdi Guuled Samantar
4. Maxamed Nuur Adan,
5. Cabdi Adan Cali,
6. Cabdullahi Cali Axmed,
7. Ibraahim Aaney Xuseen,
8. Sheekh Mursal Caliyo Maxamed,
9. Aabow Xaaji Sheekh Caliyow Suubow.

DHAQAN GAL

Qodobka 2aad

Xeerkani isla maanta ayuu dhaqan gali waana in lagu qoro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, li 7-8-1974.

Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda
Arrimaha Gudaha
*S. G. Xuseen Kulmiye*

*VISTO e registrato - Reg. n. 1, foglio n. 74.*
*Mogadiscio, 12 Agosto 1974.*
*Il Magistrato ai conti:*
Ten. Col. ABDULLAHI WARSAME NUR

---

**XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD**
**Tr. 2 Juunyo 1974, L. 84.**

**Siismi dhul Dawladeed la siiyay Maxamed Midowe Aadan — Kuna yaal magaladda Baydhaha.**

XOGHAYAHA DAWLADDA

ANNAGOO ARAGNAY Xaashaddi Kowaad iyo tii labaad ee Kacaanka iyo Qaynunkii kowaad ee 21kii Oktobar 1969;

ANNAGOO ARAGNAY Amar Xeer L. 50 taarikhdeeduna ahayd 26 Jennayo 1969;

ANNAGOO ARAGNAY Arji u soo qortay Maxamed Midowe Aadan, taarikhdeeduna ahayd 8-7-1971, uu ku weydiisanayay dhul Dawladeed kuna yaal Baydhaba;

ANNAGOO ARAGNAY Naadadii dhulka a ee lagu dhejiyey Xafiiska ku shaqa, lahaa, laguna daabacay hashida rasmiga ah ee Dawladda lmb. 17 tarikhdeeduna ahayd 28 Agosto 1973;

ANNAGOO ARAGNAY Ogolansihii gudiga farsamada dhismaha uu ku soobsaned naqshadda dhismaha taarikhdeeduna ahyad 19-1-1974;

ANNAGOO RAGNAY Warqadda tiradeedu tahay lamb. 127055 taarikhdeeduna ahayd 21-1-1974, in Jaalle Maxamed Midowe Aadan uu dhiibay Xafiiska Canshuurta Dadban lacag tiradeedu tahay Sh. So. 327, oo ah qiimahii dhulka;

ANNAGOO ARAGNAY Xaashadda ku saabsan siismaha dhulka lambarkoodu yahay WHG-3-23-66 taarikhdeeduna ahayd 31-1-1974 — in ninka kor ku magacaaban la siiyay dhul ku fadhiyaa mq. 327, kuna yaal Baydhaba;

ANNAGOO ARAGNAY Warqadda ku qoran qaynunka siismada dhulka iyo naqshadda oo tiilmameyso dhulka isaga ah;

ANNAGOO ARAGNAY Warqadda soo qortay Xofiiska Wasaaradda Hawlaha Guud taarikhdeeduna ahayd 20-4-1974, oo caddeyneyso dhismaha guriga Maxamed Midowe Aadan oo wafaqsan naqshadda dhismaha;

ISAGOO AGOONSADAY in waajibatikiisi innu ka bahay ninka kor ku soo sheegnay;

AMAR XEER

Waxaa la caddeynayaa in Iaalle Haxamed Midowe Aadan la siiyay dhul Dawladdeed ee ku fadhiyaa mq. 327, kuna yaal Baydhaba.

Muqdisho, 2 Juunyo 1974.

Xoghayaha Wasaaradda Hawlaha Guud
*G. Sare Maxamed Sheekh Cosmaan*

*VISTO e registrato - Reg. n. 1, foglio n. 21.*
*Mogadiscio, 6 Giugno 1974.*
*Il Sostituto Magistrato ai Conti:*
Jaalle MAXAMED CALI FAARAX

---

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD
Tr. 27 Juunyo 1974, L. 85.

Dhul gatay Jaalle Maxamed Buxoo Faqi — ku fadhiya mq. 273 — Kuna yaal Xamar — Xafadda Xamar Jeb-Jeb.

XOGHAYAHA DAWLADDA

ANNAGOO ARAGNAY Xaashaddi Kowaad iyo tii labaad ee Kacaanka iyo Qaynunkii Kowaad ee 21 Oktobar 1969;

ANNAGOO ARAGNAY Amar L. 115 taarikhdeeduna ahayd 13 Set. 1956;

ANNOGOO ARAGNAY Faafin Rasmi ah taarikhdeeduna ahayd 1-5-1955, lamb. 37 Reb. oo caddeyneyaa in Bobo Maxamed, la siiyay dhul Dawladeed ee ku fadhiya mq. 273, kuna yaal Xamar — Xafadda Xamar Jeb-Jeb;

ANNAGOO ARAGNAY Ogolansihii guddiga Farsamada Dhismaha uu ku saabsaned naqshadda dhismaha lambarkoodu yahay 7280 bishii 20-10-1954 soona gudubtay fadhigii 189°aad ee 19-11-1954;

ANNAGOO ARAGNAY Ogolansihii guddiga Farsamada dhismaha uu ku saabsaneed naqshadda dhismaha L. 17 ee laguna badalay naqshadda lamb. hayd 7280, soona gudubtay fadhigii 17°aad ee 16 Abril 1974;

ANNAGOO ARAGNAY Wafqadda hobsinada dhulka ay qortay Xafiiska Farsamada dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, taarikhdeeduna ahayd 5-6-1974, wahay caddeyneysa in dhismaha iyo naqshadda L. 10221 ee 11 Agosto 1973 soona gudubtay fadhigii 17°aad ee 16 Abril 1974 iyo gurigu inay iswafaqsanyihiin;

ANNAGOO ARAGNAY Warqadda so qortay Xafiiska Dawladda Hoose L. 9631 taarikhdeeduna ahayd 5-11-1956 caddeyneyso dhismaha guriga oo waafaksan naqshadda dhismaha;

ANNAGOO ARAGNAY Nuqulka L. 12386 taarikhdeeduna ahayd 24 Abril 1972, oo lagu qoray buuga Canshuurta Dadban L. 319 Vol. 20 oo lagu dhigay Notayaha Sr. Indadek Mariano oo ku saabsan kalagadasho dhul uu dhaxleen Cali Bobo Moxamed iyo Roona Bobo Maxamed oo ka gatay Jaalle Maxamed Buxoo Faqi — dhulka la mid ah mq. 273, kuna yaal Muqdisho, Xafadda Xamar Jab-Jab;

ISAGOO AQOONSADAY in waajibatikiisi inu ka bahay ninka kor ku so sheegnay;

AMAR XEER

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maxamed Buxoo Faqi — la siiyay una gatay dhulka ah mq. 273, kuna yaal Muqdisho — Xafadda Xamar Jeb-Jeb.

Muqdisho, 27 Juunyo 1974.

Xoghayaha Wasaaradda Hawlaha Guud
*G. Sare Maxamed Sheekh Cosmaan*

*VISTO e registrato - Reg. n. 1, foglio n. 25.*
*Mogadiscio, li 11 Luglio 1974.*
*Il Sostituto Magistrato ai Conti:*
Jaalle MAXAMED CALI FAARAX

XEER WASAARADDA GANACSIGA GUDAHA
Tr. 23 Luulyo 1974, L. 86.

QIIMAHA SALIIDA.

XOGHAYAHA DAWLADDA

MARKII uu arkay go'aanka 1d iyo kan 2d ee kacaanka 21ka Oktoobar 1969;

MARKII uu arkay sharciga Lambarkiisu yahay 17ka oo soo baxay 17ka Juun 1967 ee ku saabsanaa ilaalinta qiimaha alaabta lagama maarmaanka ah;

MARKII uu arkay Xeerka lambarkiisu yahay 122 ee 1d Disembar 1973, kuna saabsanaa qiimaha alaabta lagama maarmaanka ah iyo wixii ka dib laga bedeleyba;

AYADOO la maqlay Guddiga lagala tashanaayey ilaalista sicirka alaabta lagama maarmaanka ah;

WUXUU DEJINAYAA XEERKA SOO SOCDO

Qodobka 1

Qiimaha Saliida oo Kakaaladda Ganacsiga Ummadda ay maamusho waxay ahaan doonta sida aanu goynay ee hoos ku tifaftiran, laga bilaabo bishan aan ku jirno ee Luulyo 24ka 1974:

| Qiimaha ay WGU (ENC) kiiladii ku gadayso | Qiimaha ay D. Hoose kiiladii ku gadayso | Qiimaha ah Dukaanleydu kiiladii ka gadayaan |
|---|---|---|
| Sh. So. 6.89 | Sh. So. 7.02 | Sh. So. 7.27 |

Qodobka 2

Xeerkaan waxaa lagu soo sari doonaa faafinta Rasmiga ah; wuxuuna tirayaa Xeer kastoo ka soo horjeeda.

Waxaa lagu amrayaa qof walibaa in uu dhowro, dadka kalena dhowrsiiyo Xeer kaan isaga ah.

Muqdisho, 23 Lulyo 1974.

XOGHAYAHA DAWLADDA

# BOGGA SEDEXAAD

## TALOOYIN, ISGARSIIN. OGEYSIIS, IYO WAXII LA MID AH.

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

*NAADA DHUL*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Khadiija Maxamad Diiriye, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka maallintii 6-5-1974, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda 21 Oktoobar, oo leh qiyaas rektangolar ah 30x40 ,kuna fadhiya 1200 mdh.

Soohdin:
Waqooyi waxaa ka xiga Jid.
Koofur waxaa ka xiga Dhul L. 178.
Galbeed waxaa ka xiga Jid.
Bari waxaa ka xiga Dhul L. 176.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki kara naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.
Muqdisho, 14 Luulyo 1974.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka

*(167)* *Maxamed Cabdi Saciid*

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

*NAADA DHUL*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Seynab Shekh Cali, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka Maalintii 6-5-1974, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda 21 Oktoobar, oo leh qiyaas rektaangolaar 30x40, kuna fadhiya 1200 mdh.

Soohdin:
Waqooyi waxa ka xiga Dhul Lambar. 175.
Koofur waxaa ka xiga Jid. 30 meytar ah.
Galbeed waxaa ka xiga Jid.
Bari waxaa ka xiga Dhul Lambar. 179.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki kara naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 14 Luulyo 1974.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka

*(168)* *Maxamad Cabdi Saciid*

---

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

---

*N A A D A  D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Xaaji Qeyre Cali, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka Maalintii 6-7-1974, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Hawl-Wadaag, oo leh qiyaas afar-gees siman 27x27, kuna fadhiya 729 mdh.

Soohdin:
Waqooyi waxaa ka xiga Jid.
Koofur waxaa ka xiga Jid.
Galbeed waxaa ka-xiga Jid.
Bari waxaa ka xiga Jid.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki kara naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 14 Luulyo 1974.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka

*(169)* *Maxamad Cabdi Saciid*

---

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

---

*N A A D A  D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Xasan Geedi Siyaad, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka malintii 8-7-1974, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Wardhiigley, oo leh qiyaas afar gees siman 27x27, kuna fadhiya 729 mdh.

Soohdin:
Waqooyi waxaa ka xiga Xuseen Gacaney.
Koofur waxaa ka xiga Cali Axmad.
Galbeed waxaa ka xiga Hilowle Axmad.
Bari waxaa ka xiga Jid.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki kara naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 3 Luulyo 1974.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka

*(170)* *Maxamad Cabdi Saciid*

---

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

---

*N A A D A   D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Axmad Caddawe Cosoble, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka 30-6-1974, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Hawl-Wadaag, oo leh qiyaas rektaangolaar, kuna fadhiya 25x17 = 425 mdh.

Soohdin:
Waqooyi waxaa ka xiga Jaalle Maxamed Colow.
Koofur waxaa ka xiga Jidka Maka Al Mukarama.
Galbeed waxaa ka xiga Jid.
Bari waxaa ka xiga Baar Haramaaniyo.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki kara naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 22 Luulyo 1974.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka

*(171)* *Maxamad Cabdi Saciid*

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

### *N A A D A   D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Soleemaan Maxamed Saciid, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka 31-12-1963, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Shibis Jidka Nasiib Bente, oo leh qiyaas rektangolaar, kuna fadhiya 16,50x12 = 198 mdh.

Soohdin:
Waqooyi waxaa ka xiga Xaaji Gacal.
Koofur waxaa ka xiga Jid.
Galbeed waxaa ka xiga Axmad Naaji.
Bari waxaa ka xiga Jid.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki kara naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 22 Luulyo 1974.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*Maxamad Cabdi Saciid*

*(172)*

---

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

### *N A A D A   D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Xuseen Maxamed Cali, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka maalintii 20-1-1974, uu ku weydiisanayey dhul dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Yaaq-Shiid, oo leh qiyaas afar-gees siman ah, kuna fadhiya 400 = 20x20 mdh.

Soohdin:
Waqooyi waxaa ka xiga Cali Nuur Cadde.
Koofur waxaa ka xiga Jidka Ummadda.
Galbeed waxaa ka xiga Ciise Maxamuud Abiikar.
Bari waxaa ka xiga Jid.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki kara naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 28 Luulyo 1974.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*Maxamad Cabdi Saciid*

*(173)*

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

### *N A A D A   D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maxamed Xuseen Cosoble, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka maalintii 7-7-1974, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Kaaraan, oo leh qiyaas rektaangolaar ah 30x20, kuna fadhiya 600 mdh.

Soohdin:
Waqooyi waxaa ka xiga G. L. 214-61.
Koofur waxaa ka xiga Jid.
Galbeed waxaa ka xiga Jidka Balcad.
Bari waxaa ka xiga Dhul Dawladeed.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki kara naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 28 Luulyo 1974.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka

*(174)* *Maxamad Cabdi Saciid*

---

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

### *N A A D A   D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cabdullaahi Cabdi Xaaji Axmad, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka 24-1-1974, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna fadhila 880 mdh.

Soohdin:
Waqooyi waxaa ka xiga Jaalle Xaaji Maxamed Xuseen.
Koofur waxa ka xiga Jid.
Galbeed waxaa ka xiga Jidka Jen. Daaud.
Bari waxaa ka xiga Jid.
Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki kara naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 4 Agosto 1974.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka

*(175)* *Maxamad Cabdi Saciid*

### WASAARADDA HAWLAHA GUUD

## *N A A D A  D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Aadan Cosoble Cabdi Xersi, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka maalintii 7-8-1974, uu ku wey-diisanayey dhul dhismo dowladeed kun yaal Muqdisho xafadda Wardhii-gley, oo leh qiyaas rektaangoliir ah 27x13,50, kuna fadhiya 364,50 mdh.

Soohdin:
Waqooyi waxaa ka xiga Jid.
Koofur waxaa ka xiga Jid.
Galbeed waxaa ka xiga Maxamed Shidane iyo Cabdi Maxamuud.
Bari waxaa ka xiga Jid.
Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki kara naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 15 Agosto 1974.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*Maxamed Cabdi Saciid*

*(176)*

---

### WASAARADDA HAWLAHA GUUD

## *N A A D A  D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maryan Maxamuud Gacal, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka maalintii 23-7-1974, uu ku wey-diisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Hodan Jidka Afgooye, oo leh qiyaas rektaangolaar 29x33, kuna fadhiya 957 mdh.

Soohdin:
Waqooyi waxaa ka xiga Saalim Saalax Cawad.
Koofur waxaa ka xiga Cali Cabdalla.
Galbeed waxaa ka xiga Dhul Lamb. 9 iyo 11.
Bari waxaa ka xiga Jid.
Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki kara naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 15 Agosto 1974.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*Maxamed Cabdi Saciid*

*(177)*

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

*N A A D A   D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Seynab Xasan Maxamed, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka maalintii 28-7-1974, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Hodan jidka Afgooye, oo leh qiyaas rektaangolaar ah, kuna fadhiya 50x30 = 1500 mdh.

Soohdin:
Waqooyi waxaa ka xiga Jid.
Koofur waxaa ka xiga Cali Garaad Jaamac.
Galbeed waxaa ka xiga Dhul Dawladeed.
Bari waxaa ka xiga Jid.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki kara naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 15 Agosto 1974.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
(178) *Maxamad Cabdi Saciid*

---

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

*N A A D A   D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Saalim Cawad Saalax, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka maalintii 23-7-1974, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Hodan Jidka Afgooye, oo leh qiyaas sedax Gees 46x64, kuna fadhiya 1403 mdh.

Soohdin:
Waqooyi waxaa ka xiga Jid.
Koofur waxaa ka xiga Dhul Lam. 9 iyo 10.
Galbed waxaa ka xiga Jid.
Bari waxaa ka xiga Jid.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki kara naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho ,4 Agosto 1974.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
(179) *Maxamad Cabdi Saciid*

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

---

### *N A A D A   D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Saalim Maxamed Cabduraxmaan, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka maalintii 26-7-194, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Hodan Jidka Afgooye, oo leh qiyaas rektaangolaar ah 40x23, kuna fadhiya 920 dmh.

Soohdin:
Waqooyi waxaa ka xiga Dott. Cusmaan Faarax iyo dhul Dawladeed.
Koofur waxaa ka xiga Jid.
Galbeed waxaa ka xiga Dhul lamb. 13.
Bari waxaa ka xiga Jaalle Maxamed X. Faarax, Dhul Lamb. 16.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki kara naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqidisho, 15 Agosto 1974.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*Maxamad Cabdi Saciid*

*(180)*

---

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

---

### *N A A D A   D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Saalax Saalim Cabdulxabiib, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo, Dhulka maalintii 5-8-1974, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Hawl-Wadaak, oo leh qiyaas afar gees siman ah, kuna fadhiya 13,50x13,50 182,25 mdh.

Soohdin:
Waqooyi waxaa ka xiga Jid.
Koofur waxaa ka xiga Jaalle Xaaji Cali Fiiddow.
Galbeed waxaa ka xiga Jidka Kacaanka.
Bari waxaa ka xiga Jaalle Maxamed Mayooy.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki kara naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 15 Agosto 1974.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

*Badalaad Naado Dhul dawladeed oo uu weydiistay Jaalle Xasna Cabdulle Barre oo ku yaal xafadda Yaaq-Shiid (Jidka Balcad).*

Jaallaha kor ku magacaaban oo horay loo siiyay dhul dawladeed oo ku yaal Muqdisho xaafadda ujeedada ku qoran kuna fadhiya 1500 mdh. waxaa la caddeynayaa in dhulkaasi wax iska bedeleen sidii hore, sababtoo ah qorshaha cusub ee laga hirgeliye xaafadda ayada ah.

Sidaas awadeed naadadii hore loogu soo diray warqadda lambarkeedu ahaay MWD-769-815-68 ee 1-6-1968, waxay isku bedeshay sida soo socota:

Dhulka haatan la siin karo qiyaas kiisu waa rektaangolaar addimihiisu yihiin 20x40 kuna fadhiya 800 mdh. ee ma aha sidii horay la idiin soo ogeysiiyay.

SOOHDIMIHISUNA WAA SIDA HOOS KU TILMAAMAN

Waqooyi waxaa ka xiga Dhul G. L. 754-63.
Koofur waxaa ka xiga Masaajid iyo dhul lix mitir ah.
Galbeed waxaa ka xiga Jidka Balcad.
Bari waxaa ka xiga Jid P.R. ah.

Kusime:

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka

*(182)* *Jnj. C. C. Guuleed*

---

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

*Badalaad naado dhul dawladeed oo uu weydiistay Jaalle Maxamuud Jumcaale Maxamad oo ku yaal xaafadda Yaaq-Shiid-jidka Balcad.*

Jaalaha kor ku magacaaban oo horay loo siiyay dhul dawladeed oo ku yaal xaafadda kor ku magacaaban, kuna fadhiyay 390 mdh. waxaa la caddeynayaa in dhulki uu iska bedelay sidii hore, sababtoo ah qorshaha cusub ee loo sameeyay xaafadda alada ah.

Sidaas awadeed naadadii hore loogu soo diray warqadii tiradeedu ahayd MWD-489-864-68 ee 4-6-1968, waxay isku bedeshay sida soo socota:

Dhulka haa tan la siin karo qiyaas kiisu waa raktaangolaar addimihiisu yihiin 30x20 kuna fadhiya 600 mdh. ee ma aha sidii hore la idiin soo ogeysiiyay.

SOOHDIMIHISUNA WAA SIDA HOOS KU TILMAAMAN

Waqooyi waxaa ka xiga dhulka labarkiisu yahay 102.

Koofur waxaa ka xiga dhulka lambarkiisu yahay 61.

Galbeed waxaa ka xiga Jid.

Bari waxaa ka xiga Jidka Balcad.

Kusime:

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka

(183) *Inj. C. C. Guuled*

---

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

---

*Badalaad Naado dhul dawladeed oo uu weydiistay Jaalle Mediina Uehelive Rooble, kuna yaad xaafadda Yaaq-Shiid (Jidka Balcad).*

Jaallaha kor ku magacaaban oo horay loo siiyay dhul dawladeed oo ku yaal Muqdisho xaafadda ujeeddada ku qoran kuna fadhiya 1500 mdh. waxaa la caddeynayaa in dhulkaas cabirikiisi wax iska bedelay sababtoo ah qorshaha cusub ee laga hirgeliyay xaafadda ayada ah.

Sidaas awadeed naadadii hore loogu soo diray warqadda lambarkeedu ahaay MWD-754-818-68 ee 1-6-1968kii, waxay isku bedeshay sida soo socata:

Dhulka haatan la siin karo qiyaas kiisu waa rektaangolaar addimihiisu yihiin 20x10 kuna fadhiya 200 mdh. ee ma aha hore la idiin soo ogeysiiyay.

SOOHDIMIHISUNA WAA SIDA HOOS KU TILMAAMAN

Waqooyi waxaa ka xiga Masaajid.

Koofur waxaa ka xiga Dhul G. L. 847-63.

Galbeed waxaa ka xiga Kutubey Wheliye Rooble.

Bari waxaa ka xiga Jid. P.R. ah.

Kusime:

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka

(184) *Inj. C. C. Guuled*

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

*Badalaad naado dhul Dawladeed oo uu weydiistay Jaalle Makaay Weheliye Rooble kuna yaal Muqdisho, Xaafadda Yaaq-Shiid (J. Balcad).*

Jaallaha kor ku magacaaban oo horay loo siiye dhul dawladeed oo ku yaal Muqdisho xaafadda ujeeddada ku qoran, kuna fadhiya 1500 mdh. waxaa la caddeynayaa in dhulkaasi iska bedelay sidii hore, sababtoo ah qorshaha cusub ee laga hirgeliye xaafadda ayada ah.

Sidaas awadeed naadadi hore loogu soo diray warqadda lambarkeedu yahay MWD-768-817-68 ee 1-6-1968, waxay isku bedeshay sida soo socata:

Dhulka haatan la siin karo qiyaas kiisu waa rektaangolaar addimihiisuna waa 25x35 kuna fadhiya 800 mdh. ee ma aha sidii hore la idiin soo ogeysiiyay.

SOOHDIMIHISUNA WAA SIDA HOOS KU TILMAAMAN

Waqooyi waxaa ka xiga G. L. 769-63.

Koofur waxaa ka xiga Madiina Weheliye iyo Kutubey Weheliye.

Galbeed waxaa ka xiga Jidka Balcad.

Bari waxaa ka xiga Jid. P.R. ah.

Kusime:
Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka
*Inj. C. C. Guuled*

*(185)*

---

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

*Badalaad naado dhul dawladeed oo uu weydiistay Jaalle Kutubey Weheliye Rooble oo ku yaal xaafadda Yaaq-Shiid (Jidka Balcad).*

Jaallaha kor ku magacaaban oo horay loo siiyay dhul dawladeed oo ku yaal Muqdisho xaafadda ujeedada ku qoran kuna fadhiyay 1500 mdh. waxaa la caddeynayaa in dhulkii uu iska bedelay sidii hore, sababtoo ah qorshaha cusub ee laga hirgeliyay xaafadda ayada ah.

Sidaas awadeed naadadii hore loogu soo diray warqadda tiradeedu ahayd MWD-767-816-68 ee 1968, waxay isku bedeshay sida soo socota:

Dhulka haatan la siin karo qiyaas kiisu waa rektaangolaar addimihiisuna waa 20x10 kuna fadhiya 200 mdh. ee ma aha sidii hore la idiin soo ogeysiiyay.

SOOHDIMIHISUNA WAA SIDA HOOS KU TILMAAMAN

Waqooyi waxaa ka xiga Masaajid.

Koofur waxaa ka xiga Dhul G. L. 847-63.

Galbeed waxaa ka xiga Jidka Balcad.

Bari waxaa ka xiga Dhul ay leedahay Madiina Weheliye.

Kusime:
Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka
*Jnj. C. C. Guuled*

*(186)*

## DAWLADDA HOOSE EE DEGMADA KISMAYO

### *N A A D O  D H U L*

Dhamaan dadweynaha degmada Kismaio waxaa loo caddeynayaa in Jaalle Shariif Maxamed Saalax Bayti, uu soo weydiistay xafiiskaan dhismaha iyo dhulka ee degmadatan Kismayo sida uu caddeynaayo arjiga uu noo soo qortay taariikhdu markay ahayd 2-4-194ka, gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Xaafadda Calanley oo qiyaas kiisu yahay rektaangolaar addimihiisuna yihiin 10,50x24, 50x9,50 kuna fadhiya 245 mdh.

SOOHDIMIHIISUNA WAXA SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga Cumar Suldaan.

Koofur waxaa ka xiga Saciid Goodir.

Galbed waxaa ka xiga Suldaan Baaxmad.

Bari waxaa ka xiga Wadada Jacfar kimiti.

Qofkii daneynaya wuxuu si fiican uga arki karaa naqshada dhulka oo taal Xafiiska Dhismaha iyo Dhulka degmada ee dawladda Hoose ee Kismayo, waxaana laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood oo laga bilaabo Tariikhdu markey tahay 23-4-1974 ilaa 23-5-1974.

Warqadatan waxaa lagu soo dhejinayaa meesha lagu soo dhejiyo ogeysiiska dawladda Hoose.

Kisimayo, 22-4-1974.

Kusime
Gudoomiyaha Golaha Kecaanka Degmada
*Dh.me Cusmaan Cabdi*

*(187)*

---

## GUDDOOMIYAHA DEGMADA BAYDHABA

### *N A A D A  D H U L*

Waxaa loo sheegayaa dhamaan dadweynaha degan magaalada Baydhabo in sanu soo dhejinay Naado Dhul uu soo weydiistay Jaalle Maxamad Sheekh Cali Aadan oo ku yaal Baydhabo, naadadaas oo dheganaan doonta muddo ah 30 (soddon) maalmood.

Dhulkaasi wuxuu ku yaal magaalada Baydhabo jidka ubaxa Xamar, qaabsiisuna waa rektaangolaar addimihiisu yihiin 40x20 kuna fadhiya 800 mdh. soodimihiisuna waa sida hoos ku qoran:

Waqooyi waxaa ka xiga Dhul dawladeed oo bannaan.

Koofur waxaa ka xiga Beero.

Galbeed waxaa ka xiga Jaalle Cabdullaahi Iikow Mayow.

Bari waxaa ka xiga Beero.

Dhamaan dadka daneynaya waxay war faahfaahina ka heli karaan Xafiiska Guddoomiyaha degmada Baydhabo oo ay ku dhegsan-tahay naadadaasi meesha loogu talagalay ogeysiisyada.

Baydhabo, 31-10-1973.

Guddoomiyaha Degmada Baydhabo
*Jaalle Warsame Cali Faarax*

*(188)*

**MORODI — Società per Azioni**
**Saldhigeedu yahay Muqdishi — Rasul maalkeedu Shs. So. 2.000.000**

QEYBKA WARKU FADHIGA AAN CAADIGA AHEIYN

Fadhigii aan Caadiga aheiyn oo 8da Luulyo 1974, waxaan ka helay Notaayo Dott. Maxamed Xasan Jaasti oo deggan Muqdisho, oo qoraalkiisu yahay lamb. 2675, oo lagu diiwaan geliyay Muqdisho 20-7-1974 lamb. 211 Vol. 20, oo aan saxay Garsooraha Gobolka Xamar 30-7-1974, waxaa la gaaray go'aanka soo socda:

— In ay Shariikadda socoto ilaa 31-12-1977.

Muqdisho, 4 Agosto 1974.

GUDDIGA MAAMULKA

*(189)*

**MORODI — Società per Azioni**
**Sede in Mogadiscio — Capitale Socale Shs. So. 2.000.000,00**

ESTRATTO VERBALE DI ASSEMBLEA STRAORDINARIA

Dal Verbale dell'Assemblea Straordinaria dell'8 luglio 1974, ricevuto dal Notaio Dott. Mohamed Hassan Giasti di Mogadiscio, con suo atto di repertorio n. 2675, registrato a Mogadiscio il 20-7-1974 al n. 211 Atti Pubblici Vol. 20, omologato dal giudice Regionale di Mogadiscio in data 30-7-1974, risulta presa la seguente deliberazione:

— Proroga dell Società fino al 31 dicembre 1977.

Mogadiscio, 4 Agosto 1974.

IL CONSIGLIO DI AMMINISTRAZIONE

*(189)*

## O G E Y S I I S

QEYBTA WARKU FADHIGA AAN CAADIGA AHEIYN OO SHARIIKADDA QEYBAHA LEH

Fadhigii aan Caadiga ahein ee Shariikadda qeybaha Leh «Società Generale Somala — SO.GE.SOM.» — oo Saldhigeedu yahay Muqdisho, Rasu maalkeedu yahay Shs. So. 12.000.00, waxaan ka helay Nataayo Maxamed Hasan Jaasti 12ka maajo 1974, oo qoraalkiisu yahay lamb. 2470, oo lagu diiwaan geliyay Muqdisho 14ka maajo 1974 lamb. 137 Vol. 20, oo aan saxay Garsooraha Gobolka Xambar 17-7-1974, waxaa la gaaray go'aanka soo socda:

— Shariikadda waa la baabashay.

Muqdisho, 3 Agosto 1974.

MAAMULAHA
*Giuseppe Novella)*

*(190)*

# AVVISO

## ESTRATTO VERBALE DI ASSEMBLEA STRAORDINARIA DI SOCIETA' PER AZIONI

Dal Verbale dell'Assemblea Straordinaria della Società per Azioni «Società Generale Somala — SO.GE.SOM.» con sede in Mogadiscio, Capitale Sociale versato Shs. So. 12.000,00, ricevuto dal Notaio Mohamed Hassan Giasti in data 12 maggio 1974, con suo repertorio n. 2470, registrato a Mogadiscio il 14 maggio 1974 al n. 137 Atti Pubblici — Vol. 20, omologato dal Giudice Regionale di Mogadiscio in data 17 luglio 1974, risulta che la predetta Società e' stata sciolta.

Mogadiscio, 3 Agosto 1974.

Un Amministratore
*Giuseppe Novella)*

*(190)*

## XAFIISKA GARYAQAANNADA DOWLADDA

Laanta Qorista Rasmiga (Ufficio Bollettino) Uj: DHISMO RASMI AH ee SHIRKADDA «SOCIETA' AGRICOLA ZOOTECNICA INTERNAZIONALE» (SAZI) oo aniga Notaayo Dr. Maxamed Xasan Jasti aan ku dhisay warqadda lb. Rep. 2704, taarikh: 13-7-1974, Xamar laga diwaan-geliyey — 15-7-1974, lb. 208, Vol. 20.

Shirkaddaasoo fadhigeedu yahay magaaladan Xamar, ra' simaalkeeduna Shs. 10.000, danta ay leedahay oo loo dhisayna tahay:

— Ganacsiga waxyaabaha dhulka laga helo oo dhan iyo
— wax-kastoo ka yimaada xoolaha.

— Ganacsigaasoo ah dhoofin iyo keenidba, waxayna yeelan-kartaa Shirkadda, qalabka shaqadaas looga baahanyaha (attrezzi) iyo guryo ay ku shaqeeysato.

Warqadda dhisamaha waxaa laga ansixiyey Maxkamadda Gobolka Xamar 27-8-1974, lana dhigay (depositato) 1-9-1974, Shirkad lb. 1018.

Xamar, 19-9-1974.

NOTAAYO
*Dr. Maxamed Xasan Jasti*

*(190 Bis)*

UFFICIO DEL NOTAIO DELLA REPUBBLICA — MOGADISCIO

COSTITUZIONE DELLA SOCIETA' AGRICOLA ZOOTECNICA INTERNAZIONE (SAZI) S. p. A., in data 13 Luglio 1974 con Atto a mio Rogito, Rep. N. 2704 e registrato all'Ufficio Tasse sugli Affari il 15 Luglio 1974, al N. 208, Vol. 20, e' stata costituita la Società AGRICOLA ZOOTECNIA INTERNAZIONALE (SAZI) S. p. A. con Sede a Mogadiscio e col Capitale Sociale di Shs. 10.000, avente per oggetto:

— Il commercio dei prodotti agricoli e zootecnici,
— loro trasformazione e conservazione.

Il predetto Atto e' stato omologato dal Presidente del Tribunale di Mogadiscio il 27-8-1974 e depositato l'1 Settembre 1974 — Soc. N. 1018.

Mogadiscio, 19-9-1974.

NOTAIO

*Dr. Mohamed Hassan Jasti*

*(190 Bis)*